

Warbixintii raysalwasaaraha ee ahayd hordhaca war-saxaafadeedkii 12. May

Dhammaan gacaleyaal.

Hadda in ka badan 1,5 milyan dadka reer Norway ayaa tallaalka ka qaatay ugu yaraan hal qaadasho. Ku dhawaan milyan badhkeed ayaa si buuxda loo tallaalay.

Haddii tallaalladdu u socoto sida la qorsheeyay, marka la gaadho dhamaadka Luulyo ama bilowga Ogosto dhammaan dadka ka weyn 18 sanno waxay heleen fursadda qaadashada tallaalka koowaad.

Tallaalladu waxa ay ka mid yihiin waxyaalaha ugu muhiimsan ee lagula dagaallamayo fayruska koroona. Waxay innaga caawin karaan soo celinta noloshii caadiga ahayd. Iyo in la helo xorriyad inta hadda ka badan.

War-saxaafadeedkani waxa uu ku saabsanaan doonaa:

- Sida tallaallada aynu haysano loo kala siinayo dadka
- Nooca tallaallada laga isticmaali doono Norway

Mudnaansiinta dhallinyarada

Qaybta hore ee barnaamijka tallaalka waxa mudnaanta la siiyey dadka cudurka u nugul, dadka 45 sanno ka weyn iyo shaqaalaha caafimaadka.

Nidaamkaas ayaannu ku adkaysannay, inkastoo la soo jeediyey in siyaabo kale loo kala hormariyo dadka. Waxannu aaminsan nahay in aannu qaadanay go'aan sax ah.

Marka loo gudbo qaybta kale ee barnaamijka tallaalka, waxa dawladdu go'aamisay arrimahan soo socda:

- In isku hal mar tallaalka la siiyo dadka jira 18 ilaa 24 sanno iyo dadka jira 40 ilaa 44 sanno
- Ugu dambeyntana in la tallaalo dadka u dhexeeya 25 iyo 39 sanno.

Dawladdu dhallinyarada ayay hore soo marinaysaa safka tallaalka, waxaana sababaha ka mid ah:

- Is-qaadsiinta cudurku waxay ugu badan tahay dhallinyarada dhexdooda. Dadka waaweyn ee dhallinyarada ah way ka bulsho badan yihiin dadka ka waaweyn, arrintaas oo ka qaybqaadanaysa faafidda cudurka.
- Dawladdu waxa ay mar kastaba, muddadii cudurka safmarka ah socday, mudnaanta siinaysay carruurta iyo dhallinyarada, laakiin haddana carruur iyo dhallinyaro badan ayaa dhib weyni ka soo gaadhay tallaabooyinkii la soo rogay.

Go'aanka dawladdu waxa uu waafaqsan yahay talooyinka Machadka Caafimaadka Dadweynaha.

Inkastoo aanay saamayn weyn ku yeelan doonin naf iyo caafimaad midkoodna, haddana waxa Machadka Caafimaadku Dadweynuhu aaminsan yahay in faa'idada ugu badan laga helayo tallaalista haddii mudnaanta la siiyo dadka jira 18-24 sanno iyo 40-44 sanno kaddib marka la dhammeeyo dadka jira 45 sanno.

Waxa ay farta ku fiiqeen in dadka jira 40-44 sanno xoogaa u nugul yihiin in cudurku ku noqdo mid daran, halka dadka jira 18-25 sanno ay u nugul yihiin in ay cudurka qaadaan.

Go'aanka dawladda waxa muhiim u ahaa in isugeynta labadaas qodob keenayaan in la helo faa'idada ugu badan.

Sidaas ayaannu u sahli karnaa dedejinta in bulshada marba in dib loo furo.

U kala badinta degmooyinka

Dawladdu waxa ay go'aamisay in la kordhin karo heerka degmooyinka loogu kala badinayo tallaalka, laakiin shuruuddo ayaa jira.

Cudurka safmarka ah si siman ma ugu dhicin degmooyinka.

Degmooyinka qaarkood waxa aad ugu yar dadka cudurka qaaday.

Meelo kale oo waddanka ka mid ah waxa ka istaagi waayey faafidda cudurka, islamarkaana dadka ayaa muddo dheer la noolaa tallaabooyin adag oo ka-hortagga cudurka ah. Taas darteed ayay dawladdu

Machadka Caafimaadka Dadweynaha ka codsatay in ay dib u eegis ku sameeyaan habka tallaalka loogu kala badinayo degmooyinka.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu aaminsan yahay in ay in yar hoos u dhacayso tirada dadka cudur daran ku imanayo haddii tallaalka loo kordhiyo 24-ka degmooyin ee Bariga ee faafidda cudurku muddo dheer ku badnaa.

Waxa ay aaminsan yihiin in u kala badinta noocaas ahi ay fududaynayso in waddanka oo dhan isla hal mar laga debciyo tallaabooyinka ka-hortagga cudurka.

Si markaa looga maarmo in degmooyinka dhexe ee Barigu, ee wakhtiga ugu dheer ku jiray tallabooyinka adag, ay ku sii jiraan tallaabooyinkaas inta ka dhimman gu'ga iyo xagaagaba.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu soo jeediyay in degmooyinkaas la siiyo tallaal boqolkiiba 80 ka badan intii ay caadi ahaan heli lahaayeen, ilaa iyo inta dhammaan dadka ka weyn 18 sanno lagu tallaallayo qaadashada koowaad ee tallaalka. Soo jeedintaasi waxay ka dhigan tahay in 319 degmooyin tallaakooda laga jarayo boqolkiiba 40-50 bisha Juun, halka 13 degmooyin aan waxba laga beddelayn tirada tallaalkooda.

Marka la eego soo jeedinta Machadka Caafimaadka Dadweynaha, waxa jira degmooyin ka mid ah kuwa tirada tallaalka laga yarayn doono oo haddana ka mid ah degmooyinka cudurku si weyn uga dillaacay muddooyinkii dambe. Arrintaasi waxay u baahanaysaa in si wacan looga fiirsado.

Habka u kala badinta tallaalka ee la soo jeediyay ma keeni doono isbeddel weyn oo ku imanaya tirada bukaanka iyo geerida. Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu aaminsan yahay in ay xoogaa yaraan doonaan dadka cudur daran ku imanayo.

Dawladdu way rabtaa in ay raacdo talada ku saabsan in la sii kordhiyo heerka tallaalka loogu kala badinayo degmooyinka.

Sababta ugu muhiimsan waxa ay tahay in markaa bulshada Norway dib loo furi karo xilli ka horreeya sidii markii hore la filayey.

Wadajirnimu ayaynu kaga jawaabnay xaaladdan adag.

Hadafkeenu waxa weeye in aynu wadajirnimu kaga baxno xaaladdan adag.

Laakiin waxa jiray go'aammo aan fududayn in la gaadho.

Dawladdu waxay ka werwersan tahay in kordhinta heerka u kala badanintu keento in dib-u-dhac ku yimaado habsami u socodka

barnaamijka tallaalka. Degmooyinku waxa ay heli doonnaan tallaal badan bisha fasaxa la yahay ee Luulyo.

Degmooyinka uu Machadka Caafimaadka Dadweynuhu soo jeediyay in laga yareeyo tallaalka bisha Juun, waxa tallaalka loo soo celin doonaa bisha Luulyo. Waxa kale oo u soo raaci doona tallaalkii ay caadi ahaan heli lahaayeen xilligaas. Arrintaasi waxay keenaysaa in la is weydiyo; degmooyinku ma awoodaan in ay dad sidaas u badan ku tallaalan muddo sidaa u gaaban.

Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa uu gartay in marka boqolkiiba 60 ama 80 tallaalka loo kordhiyo 24 degmooyin ee bariga ku yaalla, ay faa'idada laga helayo isku mid tahay. Dawladdu waxa ay dooratay in boqolkiiba 60 loo kordhiyo. Waxa ay taasi yaraynaysaa cadaadiska ku imanaya degmooyinka kale bisha Luulyo.

Go'aanka dawladda waxa lagu saleeyey labo shuruud oo muhiim ah:

Waa in la hubsado in degmooyinka tallaalka laga yareeyey bilaha Juun iyo bilowga Luulyo ay awoodi karaan in ay tallaalidii dhaaftay ka gaadhsiin karaan dhammaadka bisha Luulyo.

Annaga iyo gudoomiyaha gobolka ayaa wadahadal la yeelan doonna degmooyinka si loogu kuurgalo in hawlaha tallaaliddu sidii la rabay u socon karaan bisha fasaxa la yahay ee Luulyo. Haddii wax laga beddelayo qaybinta tallaalka, waa in marka hore la hubsado in arrintaasi ay wax dib-u-dhac ah ku keenayn xilliga la rabo in dadka oo dhan ay qaateen tallaalka.

Dawladdu waxa kale oo ay Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadka ka codsatay in ay qiimayn degdeg ah ku sameeyaan in 24-ka degmooyin ee bariga ah ee ku jira liiska degmooyinka loo kordhinayo tallaalka, ay yihiin kuwii ku habboonaa.

Degmooyinka 24-ka ah ee ku jira liiska waxa muddo dheer ku badnaa faafidda cudurka. Laakiin waa in la eego in ay jiraan degmooyin kale oo marka la eego xaaladda faafidda cudurka, u baahan kara in mudnaanta la siiyo ama aan laga yaraynin tirada tallaalka.

Marka qiimayn lagu sameeyo labadaas arrin, ayaannu si dhakhso ah u keeni doonnaa war cad oo ku saabsan sida loo fulinayo sii kordhinta u kala badinta tallaalka.

Dawladdu waxa kale oo ay Machadka Caafimaadka Dadweynaha ka codsatay in ay eegaan in dad shaqeeya shaqooyin gaar ah, gaar ahaan macallimiinta, la siiyo mudnaanta tallaalka. Machadka Caafimaadka Dadweynaha wuxu soo jeediyay in aan sidaas la yeelin. Dawladdu waxa ay raacday soo jeedintaas.

Marka waddanka si guud loo eego macallimiintu qaaditaanka cudurka ma uga nugla dadka ka shaqeeya shaqooyinka kale. Meelaha faafidda cudurku ku badan tahay, tusaale ahaan Oslo, waa ay jirtay in macallimiintu xoogaa u sii yara nuglayd qaaditaanka cudurka. Laakiin meelahaasi waxa ay heli doonaan tallaalka dheeraad ah maadaama la gaadhay go'aan ku saabsan in mudnaanta la siiyo degmooyinka faafidda cudurku ku badnaa muddo dheer. Waxay keenaysaa in macallimiinta iyo shaqaalaha xannaanooyinka carruurta ee deegaannadaasi si dhakhso ah u helayaan tallaalka.

Tallaalku waxa uu hadda waddanka u yimaada si wacan oo lagu tashan karo. Waxa ay u badan tahay in dhammaan dadka ka weyn 18 sanno ay heli doonaan fursadda is tallaalka ka hor intaan iskuullada la bilaabin bisha Ogosto. Laakiin haddii la heli waayo tirada tallaalka ee hadda la filayo, waxannu mar kale eegi doonnaa in mudnaanta la siin karo macallimiinta iyo shaqaalaha xannaanooyinka carruurta.

Tallaallada kala duwan

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu wuxuu ku taliyay in tallaallada AstraZeneca iyo Janssen laga saaro barnaamijka tallaalka ee norwiiijiga.

Dawladduna waxay koox khuburo ah oo uu hoggaaminayo Lars Vorland ka codsatay in ay arrintan si ballaaran u qiimeeyaan ka hor intaynaan go'aan ka gaarin.

Kooxda khuburada ah waxay ku taliyeen in aan hadda la isticmaalin tallaallada AstraZeneca iyo Janssen. Waxay hoosta ka xarriiqeen in ay tallaalladu si fiican u difaacaan in cudurka aad loogu xanuunsado, oo ay waxyeelladooda halista ah dhif tahay. Sababta ay si kastaba hadda ugu talinayaan in aan la isticmaalin ayaa ah:

- Faafidda cudurka oo hadda Norway ku yar
- Ayada oo la heli karo tallaalo kale

Waxay sidaas darteed dawladdu go'aamisay in tallaalka AstraZeneca si rasmi ah looga saaro barnaamijka tallaalka ee norwiiijiga.

Waxay sidoo kale dawladdu go'aamisay in uu tallaalka Janssen weli hakad ku sii jiro oo aan lagu darin barnaamijka tallaalka. Si rasmi ah loogama saarin.

Waxaan doonaynaa in aan diyaarinno kayd la isticmaali karo haddii cudurku bato ama haddii ay cillad ku timaaddo tallaalladii nooga imaanayay shirkadaha soo saara tallaallada kale.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu sidaas ayuu ku taliyay. Tallaalka Janssen waxaa isticmaala USA iyo dalal badan oo Yurub ah. Wax intan

ka badan ayaanan mustaqbalka ka ogaan doonnaa tallaalka iyo waxyeelladiisa.

Tallaalka Janssen waa la aqoonsaday. Sababta aan loogu darayn barnaamijka tallaalka ee qarankana waa cudurka oo bulshada ku yar iyo in aan heli karno tallaallo kale.

Dalal badan ayay Norway dhaantaa. Dalal badan ayuu tallaalka Janssen aad muhiim ugu yahay oo faa'iido ugu leeyahay sidii ay u maarayn lahaayeen cudurkaan faafa. Laakiin Norway waxaa loo arkay in dhibka ka imaan kara waxyeellada ay ka badan tahay faa'iidada isticmaalkiisa. Dalal badan ayay qiimayntu noqonaysaa mid sidaas ka duwan.

Marka tallaalka AstraZeneca ama Janssen laga reebo barnaamijka tallaalka qaranka ee Norway, waxaa dhacaya in ay Norway mustaqbalka dhow ka danbayn doonto dalal badan oo Yurub ah marka la eego tirada dadka tallaallan. Laakiin Norway dadku kalsooni weyn ayay ku qabaan barnaamijka tallaalka, oo dad badan ayaa doonaya in ay is tallaallaan. Markaa in kasta oo tallaalku xoogaa wakhti ah qaadan karo, haddana waxay u badan tahay in aan tallaalno in badan oo dadweynaha ka mid ah. Ayada oo markaana lagu tallaali doono tallaal waxtarkiisu aad u sarreeyo.

Barnaamijka tallaalka qaranka ee loogu tala galay dhammaan dadka waaweyn wuxuu ka koobnaan doonaa tallaallada Pfizer BioNtech iyo Moderna.

Doorasho ikhtiyaari ah

Waxay dawladdu ka fikirtay in dadka doonaya loo oggolaan karo in ay ikhtiyaarkooda u dooran karaan in ay qaataan tallaallada Janssen- iyo AstraZeneca – si goor hore loo tallaalo.

Kooxda khuburada ah way taageereen in tallaallada Janssen- iyo AstraZeneca la qaadan karo ayaga oo aan ku jirin barnaamijka tallaalka, laakiin waxay ku kala qaybsameen sida loo qaadan karo.

Marka aan tallaalka AstraZeneca si rasmi ah uga saarnay barnaamijka tallaalka ee norwiijiga, waxaa muhiim ah in ay tallaalkaas si dhakhso ah dad kale uga faa'iideystaan.

Tallaalka Janssen kaydka ayaa la dhigayaa, waana tallaalka hal mar qofka lagu duro oo ay fududdahay in dadka la siiyo. Waxay sidaas darteed dawladdu go'aamisay in uu tallaalka Janssen noqdo kan keliya ee aan ku jirin barnaamijka tallaalka Norway ee si ikhtiyaari ah loo dooran karo.

Waxay dawladdu qabtaa in qofku, kaddib marka uu helo warbixin fiican iyo hakis, qiimayn karo in uu diyaar u yahay in uu qaato khatarta ka imaan karta tallaalka – waxaanan sidaas darteed taageernay taladii guddiga intooda tirada yar.

Laakiin ka hor intaynaan oggolaan in tallaalka Janssen si ikhtiyaari ah loo qaadan karo, waxaa jira dhawr wax oo loo baahan yahay in la helo.

Waxaan marka koowaad Agaasinka caafimaadka ka codsanaynaa in ay qiimeeyaan in loo baahan yahay shuruudo dadka qaarkiis U DIIDAYA in ay doortaan tallaalka Janssen ayada oo sababtu tahay in ay weyn tahay khatar uu u soo jiidayo.

Marka labaad na waa in aan hubinnaa in tallaalka laga helo warbixin fiican, si ay qofka ugu suurtagasho in uu go'aan gaaro asaga oo warbixin fiican haysta.

Marka saddexaad na waa in la kala caddeeyaa cidda dadka tallaalaysa. Waxaan qiyaasaynaa in dadka ikhtiyaarkood u doorta tallaalka Janssen, ay tahay in ay marka hore la hadlaan dhakhtarkooda joogtada ah. Laakiin khasab ma aha in ay dhakhaatiirtu dadka tallaalka ku duraan.

Wasiirka caafimaadka ayaa wadahalal la yeelanaya hay'adaha caafimaadka si loo kala caddeeyo cidda tallaalka dadka ku duraysa.

Waa in su'aalahaan laga jawaabaa ka hor inta aan tallaalka Janssen la siinin dadka doonaya.

Laakiin midda haddeer ba horey loo sii og yahay ayaa waxay tahay in uu tallaalka Janssen bilaash noqon doono. Dadka lagu durana haddii ay waxyeello kala kulmaan waxay hoos imaan doonaan nidaamka magdhawga dhaawaca bukaanka. Waxaa shardi ah in tallaalka si ikhtiyaari ah loo qaato kaddib marka ay shaqaale caafimaad qofka siiyaan warbixin iyo hagiis wanaagsan.

Wadashaqayn caalami ah

Waxaan hubin doonnaa in ay tallaalka AstraZeneca ka faa'iidaystaan waddammo kale. Waxaanan taas samayn doonnaa annaga oo kaashanayna Golaha fulinta ee Midowga Yurub iyo dalalka Midowga Yurub (MY) ee qaybta ka ah heshiiska AstraZeneca.

Heshiiska ka dhexeeya MY iyo AstraZeneca iyo Janssen ayaa oggolaanaya in waddammo kale tallaalka loogu deeqi karo. Waxaa dhici karta in xalku noqdo in tallaalka la sii mariyo Covax, oo ah barnaamij

tallaal lagu gaarsiinayo dalalka dakhligoodu hooseeyo- iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay.

Waxaan ku faraxsanay in Norway lagu casumay shirweynaha caafimaadka ee MY iyo dalalka G20 ee dhici doona dabayaaqada toddobaadka danbe. Waxaan halkaa uga hawlgeli doonnaa sidii tallaallada si wanaagsan loogu qaybin lahaa dalalka kale. Waxaan ognahay in cudurku uusan kala jeclayn xuddudaha dalalka, oo ay noocyo cusub dib-u-dhac ku keeni karaan horumarkii wanaagsanaa ee xagaaga la gaaray.

Sida aan niri marar hore oo badan intii uu socday cudurkaan faafa: Cidna ammaan ma aha, dalalka adduunka oo dhan oo ammaan noqda mooyaane.

Gabagabo

Bent ayaa wuxuu dhahaa – warar wanaagsan iyo kuwo aan wanaagsanayn ba waa laga soo sheegi doonnaa tallaallada. Waxaa la hubaa wararka aan maanta soo saarnay in uu dadka qaar u arki doono kuwo wanaagsan, meesha ay qaar kale u arki doonaan kuwo aan wanaagsanayn. Taas si fiican ayaan u fahamsanahay.

Maxaa yeelay go'aanka dawladda ayaa keenaya in ay dadka qaar tallaalka helaan wakhti ka horreeya kii ay filayeen, meesha qaar kale ay sugi doonaan wakhti intaas ka yara dheer. Waxay ahayd arrin ay kala doorashadeeda iyo go'aan-ka-gaaristeedu adag yihiin.

Laakiin waxaan jeclahay in aan idin xusuusiyo mid aan horey u iri. Waan ka midaysan nahay arrintan – wadajir ayaanan uga gudbaynaa.

Go'aammada ay dawladdu qaadatay, ayaa horseedaya in aan si wadajir ah dhakhso ah ugu laabanno nolol-maalmeedkii caadiga ahaa.